**Febraayo 10, 2026**
Warqadda Codbixinta Rasmiga ah ee Doorashada Gaarka ah Degmada King, Washington

Warqaddan codbixinta waxaa ku jira dhammaan tartannada iyo cabbirrada sharciga ee Degmada King. Lagama yaabo inaad u qalanto ka codeynta qaar ka mid ah tartannada iyo cabbirrada sharciga.

## Tilmaamaha

### Sida loo codeeyo



Su'aal kasta, buuxi *hal* goobaabin oo ku dhinac taal dookhaaga. Haddii aad buuxiso wax ka badan hal goobaabin, codeyntaada lama tirin karo.

### Sida loo saxo khalad




Si aad saxid u sameyso, xariiq dulmari dookhaas oo dhan. Haddii aad rabto inaad doorasho cusub sameyso, si buuxda u buuxi goobaabin kale.

**Codeynta ka bilow halkan**

## Dugsiga

**Degmada Dugsiga Bellevue Lr. 405**
**Soo Jeedinta Lr. 1**
**Dib-U-Cusbooneysiinta Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Bellevue Lr. 405 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 2025-14, ee khuseeya soo jeedin si loo joogteeyo maalgelinta waxbarashada ee hadda jirta. Soo jeedintaan waxay maalgelin doontaa hawlgallada, oo ay ku jiraan barnaamijyada CTE, shaqaalaha fasalka, la-taliyeyaasha, kalkaaliyeyaasha caafimaadka, caafimaadka maskaxda, ammaanka/amniga, waxbarashada horumarsan, barnaamijyada STEM, adeegyada waxbarashada gaarka ah, muusigga, farshaxanka iyo hawlaha manhajka ka baxsan, iyo u oggolaanaysaa Degmada inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, taasoo dib-u-cusbooneysiinaysa canshuur wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada:

| Sannadka Ururinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $0.75 | $88,300,000 |
| 2028 | $0.75 | $93,200,000 |
| 2029 | $0.75 | $97,900,000 |
| 2030 | $0.75 | $103,000,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 2025-14. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

- Haa
- Maya

**Codeynta ka sii wad dhinaca kale**
1 ee 13

Sample

## Dugsiga

**Degmada Dugsiga Bellevue Lr. 405**
**Soo Jeedinta Lr. 2**
**Dib-U-Cusbooneysiinta Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Mashaariicda Teknolojiyada iyo Hantida Waaweyn**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Bellevue Lr. 405 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 2025-15, ee khuseeya soo jeedin si loo joogteeyo maalgelinta mashaariicda teknolojiyada waxbarashada iyo hantida waaweyn. Soo jeedintaan waxay maalgelin doontaa xarumaha waxbarashada, oo ay ku jiraan teknolojiyado cusub oo ay hellaan ardayda, waxbarashada STEM ee wadajir ah iyo manhaj isku dhafan oo dhijitaal ah, kaabayaasha shabakadda/amniga internetka, saqafyada, HVAC iyo nidaamyada ammaanka/amniga, iyo u oggolaanaysaa Degmada inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, taasoo dib-u-cusbooneysiinaysa canshuur wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada:

| Sannadka Ururinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $0.54 | $64,000,000 |
| 2028 | $0.54 | $67,000,000 |
| 2029 | $0.54 | $70,000,000 |
| 2030 | $0.54 | $73,000,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 2025-15. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

- **Haa**
- **Maya**

**Degmada Dugsiga Enumclaw Lr. 216**
**Soo Jeedinta Lr. 1**
**Beddelaadda Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada**

Guddiga Agaasimeyaasha ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 1150 ee khuseeya soo jeedin lagu maalgelinayo kharashaadka barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada. Soo jeedintaan waxa ay Degmada u oggolaanaysaa inay buuxiso baahiyaha waxbarashada ee ardaydeeda iyada oo soo rogaysa canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, sida canshuur kor-u-qaadis si loogu beddelo wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, si loo taageero kharashaadka barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee uusan Gobolku maalgelin, sida ku cad Qaraarka Lr. 1150:

| Sannadka Ururinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $1.74 | $15,399,182 |
| 2028 | $1.74 | $16,316,364 |
| 2029 | $1.74 | $17,288,577 |
| 2030 | $1.74 | $18,319,122 |

Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

- **Haa**
- **Maya**

**Codeynta ka sii wad dhinaca kale**
2 ee 13

Sample

## Dugsiga

**Degmada Dugsiga Enumclaw Lr. 216**
**Soo Jeedinta Lr. 2**
**Beddelaadda Canshuurta Hantida Waaweyn ee Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Horumarinnada Teknolojiyada Waxbaridda**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Enumclaw Lr. 216 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 1151 ee khuseeya canshuurta teknolojiyada waxbaridda. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay iibsato oo rakibto qalabka iyo kaabayaasha teknolojiyada waxbaridda, bixiso tababar shaqaale oo la xiriira, iyo inay sameyso horumarinnada iyo casriyaynta kale ee teknolojiyada, si loo horumariyo barashada ardayda; iyo inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, sida ku cad Qaraarka Lr. 1151:

| | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 | |
|---|---|---|
| Sannadka Ururinta | Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
| 2027 | $0.28 | $2,472,195 |
| 2028 | $0.28 | $2,619,788 |
| 2029 | $0.28 | $2,776,236 |
| 2030 | $0.28 | $2,942,071 |
| 2031 | $0.28 | $3,117,856 |
| 2032 | $0.28 | $3,304,188 |

Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

- ⬭ **Haa**
- ⬭ **Maya**

**Degmada Dugsiga Federal Way Lr. 210**
**Soo Jeedinta Lr. 1**
**Dib-U-Cusbooneysiinta Canshuurta ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Dugsiyada Dadweynaha ee Federal Way ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 2025-12, ee khuseeya soo jeedin dib-u-cusbooneysiinaysa canshuur wakhtigeedu dhammaanayso ee loogu talagalay waxbarashada. Soo Jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuurahaan dheeraadka ah ee soo socda ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, iyadoo taageero u fidinaysa barnaamijyada waxbarashada, shaqaalaha iyo hawlgallada aan laga maalgelin/aan si buuxda looga maalgelin Gobolka, oo ay ku jiraan macallimiinta, shaqaalaha taageerada fasalka, kalkaaliyeyaasha caafimaadka, la-taliyeyaasha, gaadiidka, teknolojiyada, shaqaalaha ammaanka/amniga, u diyaargarowga kulliyadda/shaqada, ciyaaraha, farshaxanka/muusigga:

| | Qiyaas Ahaan Heerka Canshuurta/$1,000 | |
|---|---|---|
| Sannadka Ururinta | Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
| 2027 | $2.50 | $71,408,000 |
| 2028 | $2.50 | $74,978,000 |
| 2029 | $2.50 | $78,727,000 |
| 2030 | $2.50 | $82,663,000 |

Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

- ⬭ **Haa**
- ⬭ **Maya**

**Codeynta ka sii wad dhinaca kale**




Sample

## Dugsiga

**Degmada Dugsiga Fife Lr. 417**
**Soo Jeedinta Lr. 1**
**Dib-U-Cusbooneysiinta Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgalka**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Fife Lr. 417 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 25-23 ee khuseeya soo jeedin ku saabsan dib-u-cusbooneysiin canshuur oo loogu talagalay waxbarashada.

Haddii la ansixiyo, soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, oo dib-u-cusbooneysiinaysa canshuur wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, oo loogu talagalay hawlgallada aan si buuxda looga maalgelin Gobolka (oo ay ku jiraan macallimiinta, kalkaaliyeyaasha caafimaadka, la-taliyeyaasha, taageerada ardayda, buugaagta waxbarashada, qalabka, agabyada, sahayda, hawlaha ka baxsan manhajka (ciyaaraha, farshaxanka), dayactirka, adeegyada tamarta, ammaanka/amniga, gaadiidka):

| Sannadka Ururinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $1.97 | $15,500,000 |
| 2028 | $1.97 | $16,600,000 |
| 2029 | $1.97 | $17,700,000 |
| 2030 | $1.97 | $18,800,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 25-23. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

- ⬭ **Haa**
- ⬭ **Maya**

**Degmada Dugsiga Issaquah Lr. 411**
**Soo Jeedinta Lr. 1**
**Canshuurta Beddelaadda ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Issaquah ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 1248 ee khuseeya soo jeedin si loo taageero barnaamijyada dugsiga iyo hawlgallada maalinlaha ah. Soo Jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ah ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada si loo joogteeyo barnaamijyada waxbarashada loona taageero barnaamijka Sanduuqa Guud ee Degmada, hawlaha maalinlaha ah, waxbaridda, agabyada fasalka, hawlaha ka baxsan manhajka, iyo gaadiidka:

| Sannadka Ururinta | Qiyaas Ahaan Heerka Canshuurta/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $1.25 | $75,200,000 |
| 2028 | $1.24 | $78,200,000 |
| 2029 | $1.22 | $81,000,000 |
| 2030 | $1.19 | $82,800,000 |

sida ku cad Qaraarka Lr. 1248 iyadoo la raacayo xaddidaadaha sharciga ee ku aaddan caddadka iyo heerarka canshuurta wakhtiga canshuurta la soo rogayo. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

- ⬭ **Haa**
- ⬭ **Maya**

**Codeynta ka sii wad dhinaca kale**


Sample

## Dugsiga

**Degmada Dugsiga Issaquah Lr. 411**
**Soo Jeedinta Lr. 2**
**Canshuurta Beddelaadda ee Mashaariicda Hantida Waaweyn (Teknolojiyada iyo Dayactirka Muhiimka ah)**

Guddiga Agaasimeyaasha ayaa ansixiyay Qaraarka Lr. 1249 oo oggolaanaya canshuur loogu talagalay teknolojiyada/casriyaynta. Canshuurtaan waxay maalgelinaysaa dayactirka muhiimka ah ee xarunta, horumarinnada, iyo beddelaadyada; horumarinnada teknolojiyada, qalabka, shaqaaleysiinta, iyo horumarinta xirfadeed si loo taageero loona mideeyo nidaamyada iyo adeegyada teknolojiyada ee degmada oo dhan iyo cusbooneysiinta ku aaddan ammaanka, amniga iyo hufnaanta, waxayna oggolaanaysaa canshuurta dheeraadka ah ee soo socota ee dhammaan hantida canshuuri karo ee gudaha Degmada:

| Sannadka Ururinta | Qiyaas Ahaan Heerka Canshuurta/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $0.65 | $39,169,000 |
| 2028 | $0.60 | $37,806,000 |
| 2029 | $0.59 | $39,341,000 |
| 2030 | $0.59 | $41,194,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 1249. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

- ⬭ **Haa**
- ⬭ **Maya**

**Degmada Dugsiga Issaquah Lr. 411**
**Soo Jeedinta Lr. 3**
**Canshuurta Baska Dugsiga**

Guddiga Agaasimeyaasha ayaa ansixiyay Qaraarka Lr. 1250 oo oggolaanaya canshuur loogu talagalay basaska dugsiga. Canshuurtaan waxay maalgelinaysaa basaska dugsiyada cusub iyo kuwo beddel ah iyo kaabayaasha dallacaadda korontada waxayna oggolaanaysaa canshuurta dheeraadka ah ee soo socota ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada:

| Sannadka Ururinta | Qiyaas Ahaan Heerka Canshuurta/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $0.03 | $2,000,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 1250. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

- ⬭ **Haa**
- ⬭ **Maya**

**Codeynta ka sii wad dhinaca kale**



Sample

## Dugsiga

**Degmada Dugsiga Lake Washington Lr. 414**
**Soo Jeedinta Lr. 1**
**Beddelaadda Canshuurta Hadda Jirta ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada**

Guddiga Agaasimeyaasha ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 2411, ee khuseeya maalgelinta waxbarashada ee ku aaddan barnaamijyada iyo adeegyada ardayda. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay beddesho canshuur ay wakhtigeedu dhammaanayso iyadoo soo rogaysa canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, si loo bixiyo taageerada ku aaddan barnaamijyada waxbarashada, shaqaalaha iyo hawlgallada ee uusan maalgelin ama si buuxda uusan u maalgelin Gobolka:

| Sannadka Ururinta | Qiyaas Ahaan Heerka Canshuurta/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $0.99 | $124,500,000 |
| 2028 | $0.97 | $131,300,000 |
| 2029 | $0.95 | $138,300,000 |
| 2030 | $0.92 | $145,500,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 2411. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

- ⬭ **Haa**
- ⬭ **Maya**

**Degmada Dugsiga Lake Washington Lr. 414**
**Soo Jeedinta Lr. 2**
**Beddelaadda Canshuurta Hadda Jirta ee Mashaariicda Teknolojiyada iyo Hantida Waaweyn**

Guddiga Agaasimeyaasha ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 2412 ee khuseeya beddelaadda canshuurta mashaariicda teknolojiyada iyo hantida waaweyn ee wakhtigeedu dhammaanayso. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, si ay u taageerto hagaajinta iyo casriyaynta xarumaha; oo ay ku jiraan teknolojiyada waxbarashada, softiweerka iyo tababarka; nidaamyada dhismaha, caafimaadka iyo ammaanka iyo horumarinnada goobta ee Degmada oo dhan:

| Sannadka Ururinta | Qiyaas Ahaan Heerka Canshuurta/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $0.44 | $54,600,000 |
| 2028 | $0.44 | $59,400,000 |
| 2029 | $0.44 | $63,700,000 |
| 2030 | $0.44 | $69,200,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 2412. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

- ⬭ **Haa**
- ⬭ **Maya**

**Codeynta ka sii wad dhinaca kale**


Sample

## Dugsiga

**Degmada Dugsiga Mercer Island Lr. 400**
**Soo Jeedinta Lr. 1**
**Beddelaadda Canshuurta ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Mercer Island Lr. 400 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 747, ee khuseeya maalgelinta waxbarashada. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, si ay u beddesho canshuur wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, si loo taageero barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada Degmada ee uusan maalgelin ama si buuxda uusan u maalgelin Gobolka:

| Sannadka Ururinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $0.72 | $16,000,000 |
| 2028 | $0.75 | $17,000,000 |
| 2029 | $0.77 | $18,000,000 |
| 2030 | $0.80 | $19,000,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 747. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

◯ **Haa**
◯ **Maya**

**Degmada Dugsiga Northshore Lr. 417**
**Soo Jeedinta Lr. 1**
**Dib-U-Cusbooneysiinta Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada**

Guddiga Agaasimeyaasha ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 911 ee khuseeya dib-u-cusbooneysiinta canshuurta barnaamijyada waxbarashada. Soo Jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay cusbooneysiiso canshuur wakhtigeedu dhammaanayso oo loogu talagalay barnaamijyada waxbarashada iyo hawlaha u qalma ee aan gobolku maalgelin iyadoo la soo rogayo canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada:

| Sannadka Ururinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $1.40 | $92,000,000 |
| 2028 | $1.44 | $99,000,000 |
| 2029 | $1.48 | $107,000,000 |
| 2030 | $1.53 | $115,000,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 911. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

◯ **Haa**
◯ **Maya**

**Codeynta ka sii wad dhinaca kale**
7 ee 13

Sample

## Dugsiga

**Degmada Dugsiga Northshore Lr. 417**
**Soo Jeedinta Lr. 2**
**Curaarta Waajibaadka Guud**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Northshore Lr. 417 ayaa ansixiyay Qaraarka Lr. 912, ee khuseeya soo jeedin loogu talagalay curaarta. Soo Jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay dib u habeyn ku sameyso oo ay dhisto xarumaha dugsiga; yareeyso fasallada la qaadi karo; hagaajiso badbaadada dhul-gariirka iyo xarumaha ciyaaraha; dhisto ballaarin iyo dib u habeyn Dugsiga Hoose ee Kokanee; beddesho Dugsiga Hoose ee Shelton View; qorsheyso beddelaadyo dheeraad ah iyo dhismaha Dugsiga Dhexe ee Leota iyo Dugsiga Sare ee Inglemoor; iyadoo la soo saarayo ilaa iyo $698,000,000 oo ah curaarta waajibaadka guud oo ku buuxsamaya 21 sanno gudahood, iyo soo rogista canshuurta hantida ee sannadlaha ah ee dheeraadka ah si dib loogu bixiyo curaarta, dhammaan sida lagu sharxay Qaraarka Lr. 912.

Ma tahay in soo jeedintaan la:

◯ **Ansixiyo**

◯ **Diido**

**Degmada Dugsiga Northshore Lr. 417**
**Soo Jeedinta Lr. 3**
**Dib-U-Cusbooneysiinta Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Mashaariicda Teknolojiyada iyo Hantida Waaweyn**

Guddiga Agaasimeyaasha ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 913 ee khuseeya dib-u-cusbooneysiinta canshuurta mashaariicda teknolojiyada iyo hantida waaweyn. Si loo casriyeeyo nidaamyada teknolojiyada, loo xoojiyo kaabayaasha iyo amniga xogta, loo taageero waxbarashada ardayda iyada oo loo marayo manhajka iyo softiweerka waxbaridda, loo helo qalab, oo ay ku jiraan aaladaha ardayda, iyo bixinta tababar ku aaddan ardayda iyo shaqaalaha, soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ee soo socda ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada:

| Sannadka Ururinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $0.54 | $35,500,000 |
| 2028 | $0.52 | $35,500,000 |
| 2029 | $0.49 | $35,500,000 |
| 2030 | $0.47 | $35,500,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 913. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

◯ **Haa**

◯ **Maya**

**Codeynta ka sii wad dhinaca kale**
8 ee 13

Sample

## Dugsiga

**Degmada Dugsiga Riverview Lr. 407**
**Soo Jeedinta Lr. 1**
**Canshuurta Beddelaadda ee Barnaamijyada Waxbarashada Dayactirka iyo Hawlgallada**

Guddiga Agaasimeyaasha ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 25-6 ee khuseeya canshuur beddelaad ah oo ku aaddan barnaamijyada waxbarashada. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay beddesho canshuur wakhtigeedu dhammaanayso oo loogu talagalay barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada dugsiga kuwaas oo ah hawlaha u qalma oo aan gobolku maalgelin iyadoo la soo rogayo canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada:

| SannadkaUrurinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | CaddadkaCanshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $1.50 | $12,882,801 |
| 2028 | $1.50 | $13,268,589 |
| 2029 | $1.50 | $13,665,950 |
| 2030 | $1.50 | $14,075,233 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 25-6. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

- [ ] **Haa**
- [ ] **Maya**

**Degmada Dugsiga Riverview Lr. 407**
**Soo Jeedinta Lr. 2**
**Canshuurta Beddelaadda ee Mashaariicda Teknolojiyada iyo Hantida Waaweyn**

Guddiga Agaasimeyaasha ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 25-7 ee khuseeya soo jeedin ku aaddan canshuurta mashaariicda teknolojiyada iyo hantida waaweyn. Soo Jeedintaaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada si ay u hesho teknolojiyada iyo qalabka, oo ay ku jiraan kombuyuutarrada fasalka; dayactir ku sameyso nidaamyada dhismaha, ku darto meel fasalka la qaadi karo iyo sameynta casriyaynta ammaanka iyo amniga:

| SannadkaUrurinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | CaddadkaCanshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $0.56 | $4,800,000 |
| 2028 | $0.54 | $4,800,000 |
| 2029 | $0.53 | $4,800,000 |
| 2030 | $0.51 | $4,800,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 25-7. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

- [ ] **Haa**
- [ ] **Maya**

**Codeynta ka sii wad dhinaca kale**



Sample

## Dugsiga

**Degmada Dugsiga Riverview Lr. 407**
**Soo Jeedinta Lr. 3**
**Curaarta Waajibaadka Guud**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Riverview Lr. 407 ayaa ansixiyay Qaraarka Lr. 25-8, ee khuseeya soo jeedin loogu talagalay curaarta. Soo Jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay beddesho Dugsiga Dhexe ee Tolt oo ay dib u isticmaasho qaybo ka mid ah kambaska oo ku aaddan goob bulsho oo dabacsan iyo jiimka; inay horumarinnada ammaanka iyo amniga ku sameyso albaabada laga galo dugsiyada; ballaarinta, dib u habeyso oo ay sameyso nidaamyada iyo horumarinnada kale ee hantida waaweyn ee dugsiyada iyo xarumaha degmada oo dhan, iyadoo soo saaraysa ilaa iyo $185,500,000 oo ah curaarta waajibaadka guud oo ku buuxsamaya 20 sanno gudahood, iyo inay soo rogto canshuurta hantida sannadlaha ah ee dheeraadka ah si dib loogu bixiyo curaarta, dhammaan sida lagu sharxay Qaraarka Lr. 25-8.

Ma tahay in soo jeedintaan la:

◯ **Ansixiyo**

◯ **Diido**

**Degmada Dugsiga Shoreline Lr. 412**
**Soo Jeedinta Lr. 1**
**Beddelaadda Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Shoreline Lr. 412 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 2025-15, ee khuseeya soo jeedin lagu maalgelinayo kharashaadka barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay buuxiso baahiyaha waxbarashada ee ardaydeeda iyadoo soo rogaysa canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, oo beddelaysa canshuurta wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, si loo taageero kharashaadka barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada Degmada ee uusan Gobolka Washington maalgelin:

| Sannadka Ururinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $1.67 | $39,000,000 |
| 2028 | $1.69 | $41,500,000 |
| 2029 | $1.71 | $44,000,000 |
| 2030 | $1.72 | $46,500,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 2025-15. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

◯ **Haa**

◯ **Maya**

Sample

## Dugsiga

**Degmada Dugsiga Shoreline Lr. 412**
**Soo Jeedinta Lr. 2**
**Beddelaadda Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Hantida Waaweyn ee Horumarinnada Teknolojiyada iyo Taageerada**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Shoreline Lr. 412 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 2025-16, ee khuseeya soo jeedinta maalgelinta horumarinnada teknolojiyada iyo taageerada. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay iibsato oo rakibto teknolojiyada waxbaridda si loo horumariyo barashada ardayda, loo casriyeeyo qalabka teknolojiyada ee Degmada oo dhan, nidaamyada iyo kaabayaasha, inay bixiso tababar iyo taageero la xiriira, iyo soo rogista canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, oo beddelaysa canshuur wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada:

| Sannadka Ururinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $0.30 | $7,000,000 |
| 2028 | $0.29 | $7,000,000 |
| 2029 | $0.27 | $7,000,000 |
| 2030 | $0.26 | $7,000,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 2025-16. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

- ◯ **Haa**
- ◯ **Maya**

**Degmada Dugsiga Snoqualmie Valley Lr. 410**
**Soo Jeedinta Lr. 1**
**Dib-U-Cusbooneysiinta Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Snoqualmie Valley Lr. 410 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 896, ee khuseeya soo jeedinta canshuurta dib-u-cusbooneysiinta waxbarashada. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, iyadoo cusbooneysiinaysa canshuur wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada si loo maalgeliyo barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee aan si buuxda looga maalgelin Gobolka, oo ay ku jiraan u diyaargarowga xirfadda/kulliyadda, farshaxanka/muusigga, shaqaalaha, taageerada caafimaadka maskaxda, hawlaha ka baxsan manhajka, koorsooyinka ikhtiyaariga ah, nafaqada, ammaanka:

| Sannadka Ururinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $1.55 | $27,320,000 |
| 2028 | $1.55 | $28,686,000 |
| 2029 | $1.55 | $30,120,000 |
| 2030 | $1.55 | $31,626,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 896. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

- ◯ **Haa**
- ◯ **Maya**

**Codeynta ka sii wad dhinaca kale**



Sample

## Dugsiga

**Degmada Dugsiga Snoqualmie Valley Lr. 410**
**Soo Jeedinta Lr. 2**
**Dib-U-Cusbooneysiinta Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Teknolojiyada**

Guddiga Agaasimeyaasha ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 897, ee khuseeya canshuurta dib-u-cusbooneysiinta ee taageereysa teknolojiyada ku aaddan ardayda Snoqualmie Valley. Soo Jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, dib-u-cusbooneysiinta canshuur wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, iyo inay bixiso kharashaadka teknolojiyada ee aan Gobolku maalgelin, sida nidaamyada shabakadda, aaladaha, softiweerka, tababarka iyo taageerada:

| | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 | |
|---|---|---|
| Sannadka Ururinta | Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
| 2027 | $0.56 | $9,848,000 |
| 2028 | $0.55 | $10,094,200 |
| 2029 | $0.53 | $10,346,555 |
| 2030 | $0.52 | $10,605,219 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 897. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

◯ **Haa**

◯ **Maya**

**Degmada Dugsiga Tahoma Lr. 409**
**Soo Jeedinta Lr. 1**
**Beddelaadda Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada**

Guddiga Agaasimeyaasha ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 2025-14 ee khuseeya soo jeedin taageeraysa barnaamijyada waxbarashada ee uusan gobolku maalgelin. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay beddesho canshuur wakhtigeedu dhammaanayso iyadoo soo rogaysa canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, si ay u bixiso taageerada barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada, oo ay ku jiraan farshaxanka, ciyaaraha, hawlaha manhajka ka baxsan, waxbarashada gaarka ah, tababarka macallimiinta, iyo shaqaalaha si ay u taageeraan hawlgallada degmada, ammaanka, iyo fayoqabka:

| | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 | |
|---|---|---|
| Sannadka Ururinta | Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
| 2027 | $2.37 | $31,233,375 |
| 2028 | $2.37 | $32,795,043 |
| 2029 | $2.37 | $34,434,795 |
| 2030 | $2.37 | $36,156,535 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 2025-14. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

◯ **Haa**

◯ **Maya**

Sample

**Codeynta ka sii wad dhinaca kale**

## Dugsiga

**Degmada Dugsiga Tahoma Lr. 409**
**Soo Jeedinta Lr. 2**
**Beddelaadda Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Mashaariicda Hantida Waaweyn ee Teknolojiyada**

Guddiga Agaasimeyaasha ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 2025-15 ee khuseeya soo jeedin ku aaddan canshuurta mashaariicda hantida waaweyn ee teknolojiyada. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada si loo helo teknolojiyada waxbarashada iyo hawlgalka, qalabka, softiweerka, shaqaalaha, tababarka iyo taageerada farsamada:

| Sannadka Ururinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $0.39 | $5,145,316 |
| 2028 | $0.39 | $5,402,582 |
| 2029 | $0.39 | $5,672,711 |
| 2030 | $0.39 | $5,956,346 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 2025-15. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

⬭ **Haa**

⬭ **Maya**

**Degmada Dugsiga Vashon Island Lr. 402**
**Soo Jeedinta Lr. 1**
**Beddelaadda Canshuurta ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgalka**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Vashon Island Lr. 402 ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 826, ee khuseeya soo jeedin lagu maalgelinayo kharashaadka barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgalka. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay buuxiso baahiyaha waxbarashada ee ardaydeeda iyadoo soo rogaysa canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda, oo ku beddelaysa canshuurta wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, si loo taageero kharashaadka barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgalka Degmada ee uusan Gobolka maalgelin:

| Sannadka Ururinta | Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha la qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $1.50 | $7,083,882 |
| 2028 | $1.50 | $7,507,375 |
| 2029 | $1.50 | $7,956,277 |
| 2030 | $1.50 | $8,432,113 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 826. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

⬭ **Haa**

⬭ **Maya**

**Dhammaadka Warqadda Codbixinta**

Sample

Sample